Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kal. 3-aad
Documeenti kal. 3-aad kul. 22-aad **28.10.2013**

Kal.3-aad
kul. 22-aad Sac. Fur. 11:28 - Sac.xir.1:33
Qourum- 172
Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Quraanka Kariimka .**
2. **Ansixinta Ajendaha.**
3. **Ansixinta Maxdar Qoraalada Golaha.**
4. **Doodii Favori (socotay)**

Shir Gudoomiyaha Gudoomiye k/x 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad.

Waxa shirka furayGuddoomiye k/x 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad, waxaana lagu furay Aayadaha Quraanka Kariimka ah uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay inuu joogo Wasiirka Warfaafinta,Gaadiidka, Boostada iyo Isgaarsiinta, wuxuuna uyeeray Wasiirka si'uu ugu jawaabo su'aalihii shalay intii dhinne-yd.

Jawaab:
Wasiirku wuxuu sheegay haddii laba sharciay jiraan , mid dambe iyo mid hore, waxaa markasta laraacaya midka dambe, taasina waxaa sheegaya Qod. 61-aad ee Dastuurka, sharcina waxaa ugu sareeya Dastuurka. Deposit waxaan uqaadanay inaan amount galinaa Profile-ka shirkada (Axmed Saki) wuxuuna soo shaqo bilaabay 1998kii.

Xil. Joodax. (**Point of order**)Wuxuu sheegay Sharciga Wasaarada Maaliyada iyo xisaabaadka. Wuxuu kaloo xusay in sharciga la'aasaasay Dec .1998kii, sharcigana waxaa hagaya heshiisyada.

Su'aalo:
Xil. C/llaahi Jaamac. wuxuu sheegay inuu Wasiirku fasiro waxa horyaala, walina Soomaaliya ma'aysan gaarin inay shirkado utartamaan.

Xil. Macallin Cali. Wuxuu soo jeediyey in xaalada maanta dalka uu maraayo markii la'eego in shirkadaha loo sameeyo waxa layiraahdo assessment.

Jawaab:
Wasiirku wuxxu sheegay in uu ogyahay in wadanka ay kamaqan yihiin shuruuc badan oo dalka lagu maamuli jiray, wixii investment ah wuxuu sheegay inay soo dhaweynayan, lawyarada xukuumada wey la joogeen oo kamid ayey ahaayeen waxaana kamid ah

Mudane Sadiiq, Kastamka Xukuumada Soomaaliya ayaa mas'uul ka'ah, wixii howlo ahaa waxaa lawareegay shaqaalihii hore.

Su'aalo:
Xil. Jaamac. wuxuu sheegay in la'abaaro meesha danta ugu jirta dadka iyo dalka iyo sida ay ugu qanci karaan ummadda Soomaaliyeed, kambani yar oo qaadanaayo 55%, wuxuu soo jeediyey in Wasiirku dib uhagaajiyo uu layimaado wax sax ah**.**

Xil. C/llaahi Bile. Wuxuu sheegay in waayadaan ay soo baxayaan shirkado heshiis lala galaayo, waqti tijaabo ahna sameynaaya.

Xil. C/qaadir Sandheere. Wuxuu soo jeediyey inan leyskulaysbar-bardhigikarin (compare), gareynin SKA iyo Favori, SKA way aheyd wax laceersho, wuxuu dhulka Airporka leeyahay qiyaas 150 miles qiyaas consegative-ka ah, 45% iyo 55% waa bilow fiican.

-Wasiirku insurance -ga sifiican ayuu ugu jawaabay
-iyo Soomaaliya oo la siindoono mashruucaan, laakiin ay layimaadaan qualification fiican .
-SKA waa laceeriyey, welina wey joogtaa, ninkii difaacayana xaq buu uleyahay.
-Turkiga iyo Campaign ka wey kala duwan yihiin
. Turkigu waa walaalahen Campaign kaan ma'aha mid lagu baarayo shidaal (petrol).

Jawaab:
Wasiirka, wuxuu sheegay in shirkadda Favori ay siiyeen qandaraaskaas 15 sano ah, haddii ay kasoo bixi waayaan howshii qandaraaska ay ku qateyn, wey joogsaneysaa shaqadooda, heshiiskuna ma'aha Aayad Qur'aan ah.
-Waxaa labaneeyey dhamaan deegaanadii kadhisnaa garoonka diyaaradaha, sababo amaanka awgiisa, markii ladhameeyo dhismaha garonka diyaradaha, ceymiska waxa lawareegaya Dowladda Fedaraalka Soomaaliya.
-wuxuu sheegay inuusan difaceynin dan isagu leeyahay, laakiin uu difacaayo mas'uuliyadiisa iyo waajibaadkiisa guud ahaan (collective responsibility).
-Tankale shirkada maraadsan ee waa loola yimid waana lagala tashaday waraaqo ayaa loo keensaday.

Su'aalo:
Xil. Maryan Cariif. Waxay sheegtay in Baarlamaanku uu ku sheegayo sharci (maxaa sharci ah, maxaase sharci aheyn). Shirkadda Favori waa shirkadii ugu horeysay ee soo jeedisey Dalka iney maalgalineyso, maalgalintaasi Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed faa'iido ma'utahay mise maya?
-waxay intaa kudartay in Wasiirku markuu heshiisyadaan galaayey aad ma'uga taxadaray, shuruucyo iyo wixii dulduleelo ah?

Xil. Cusmaan Aadan Dhuubow. Wuxuu sheegay sida ku cad Qod. 92-aad ee Dastuurka, markii lagalaayo heshiis caalami ah,wuxuu intaa ku daray heshiiskaan in Baarlamaanka lahor keeno, ay xoogooda inta ugu badan ayagu leeyihiin.
wuxuuna su'aalay Wasiirka waxa ka dhaxeeya garoonka diyaradaha iyo rugta Ganacsiga Baris?

Xil. Cali Khaliif Galeyr. Wuxuu weydiiyey lacagaha 18ka.malyan in ay leedahay shirkadda ama ay tahay amaah ay Dowladda Turkiga bixineyso? Wuxuu sheegay Soomaaliya in ay tahay meel ay kambaniyaalka aduunka ay raadinayaan si' ay u maalgashadaan.
-wuxuu kaloo sheegay in ay meesha yaaliin labo xujo, in internal community ga diyaar u'yahay iyo in shirkadda Favori walaalaheena ah oo Turkiga kasocdaay diyaar u yihiin. waxaa la'ogsoonyahay cidda usoo gurmatay Soomaaliya oo wax u soo gurmadey markii lawaayey, ay ahaayen Dowlada Turkiga , taasna ay tahay in loo lahaado fejignaan dheeraad aanan, (warka waxaa lagu buuxiyey sacbis).
wuxuu inntaa ku daray in shirkadda SKA ay dacwad ku furidoonto Dowladda Soomaaliya, taasna waa in loo diyaargaroobaa, sida loola heshiiyey iyo sidii garoonka looga saaray, taasoo sharaf dhac ku keenikarta Dowladeena, wuxuu kaloo intaa ku daray in heshiiska Turkiga lagu daro in Docimeentiyada leysla ogaado si'aysan usoo bixin wax caqabado ah, si loo helo wax danteena iyo dantoodaba ah, inta ay bisilyihiinna wuxuu soo jeediyey in lamaalo.

Jawaab:
Wasiirku wuxuu sheegay in aan la'ansixinin sharciga maalgashiga (investment). Heshiiska waxay saldhig uga dhigeen in uu sharciga Dalka ogolyahay, contractiga waxaa ugu qeyb galay 5ruux, wixii isbedel ah oo yimaada bilaha soo socda Golaha wuu u'furan yahay iney kusoo celiyaan Wasaaradda Warfaafinta iyo gaadiid Weydiimahooda.
wuxuu kaloo shegay in SKA heshiiskii (contractiga) lala galay ay ku bilaabatay in Dawladda ay ka hesho saami gaaraya 35% muddo kadibna uu sheegay Wasiirku in ay gaarsiiyeen 40%.
wuxuu intaa ku daray in aysan wax go'aan ah isaga loo keenay oo kusaabsan SKA, go'aanka awooda maxkamada wuu dhaafsiisan yahay.
18.Milyan wuxuu sheegay in aysan Deeq iyo Deyn midna ma'ahayn ee waa maalgashi Turkiga bixisay.

Xil. Cali Khaliif Galeyr (point of order)shirkadda miisaniyadeeda waa $4.000.000 (afar malyan oo doollar) ee $18.000.000 xagee ka keneysaa?
f.g wuxuu sheegay in alaab badan laga keenidoono dibadda.

Jawaab:
Wasiirku wuxuu sheegay su'aalaha inta badan uu ka jawaabay, waxa ay wadan iney tahay faalo kabixin **(comments).**

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in 19 Xildhibaan ay hadleen, 21 Xildhibaan ay doodooda harsan tahay .

Shir-Guddoonka Guddoomiye k/x. 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad uu Shir- Guddoominaayey kal.3-aad kul. 22-aad uu sheegy inuu shirku xiran yahay saacada markey aheyd 1:33 gd.